



Aqoonta Magacaabista Xarfaha

Magacaabista xarfaha alifbeetada si dhakhso ah | Fasalka barbaarinta iyo fasalka 1'waad

Waxay Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego isticmaashaa mCLASS DIBELS 8 si ay ula socoto horumarka xirfadaha akhriska ee ilmahaaga inta lagu jiro sannad dugsiyeedka. Isticmaal haggahaan kooban si aad u fahamto imtixaanka hoose ee Aqoonta Magacaabista Xarfaha (Letter Naming Fluency [LNF]) ee fasalka barbaarinta iyo fasalka 1'waad iyo si aad u ogaato habab fudud oo ciyaar u eg oo aad guriga ku wada tababaran kartaan.

Waxyaabaha aan ka shaqeynayno

Xirfadaan waa sida uu dhawaaqeedu tilmaamayo; wuxuu ilmahaaga fiirinayaa xarfo markaasna wuu magacaabayaa, isagoo ka shaqeynaayo inuu saxo iyo uu ku sii dhakhsado magacaabista markii uu waqti ka soo wareego. Waxaa arrintaan la fiiriyaa marka la gaaro qiimeynta heerka la dejiyey. Garashada xarfaha si dhakhso ah waxay u sahlayaa maskaxda ilmahaaga inuu mustaqbalka diirada saaro ku dhawaaqista erayada meesha uu ka joogsan lahaa si uu u xusuusto magacyada xarfaha.

Xirfadaha ay arrintaan sii dhisto

Araga kala duwanaanshaha

Araga kala duwanaanshaha yaryar ee u dhexeeya qaababka iyo calaamadaha, sida b iyo d.

Farta qoran meel kasta ayey ku taalaa

Fahamka in calaamadaha ku yaala bogga ama calaamadaha kale sida kuwa jidadka ay xambaarsan yihiin macne.

Hadalka iyo dhegaysiga

Erayada guud iyo raacitaanka tilmaamo afka lagu bixiyey oo fudud.

Haynta iyo tilmaamida

In si raaxo leh loo qabsado qalin ama qalin-midabeed (crayon), isla markaana la lagu tilmaamo (pointing) ama lagu fiigo saf far qoran.

Habab xiiso leh oo guriga loogu sameeyo tababar - 5 ilaa 10 daqiiqo, dhowr mar asbuuci

Raadinta xarfaha

5 daqiiqo

Si wadajir ah u raadiya xarfaha ku yaalo sanduuqyada badarka (cereal boxes), calaamadaha wadooyinka, ama daboolada buuggaagta, oo kor ugu dhawaaq magaca xaraf kasta markaad aragto.

Ka fiicnaaw wakhtigaagii hore

2 ilaa 3 daqiiqo

Qor saf xarfo ah markaas ka dib waqti u qabo sida dhakhsaha uu ilmahaaga u magacaabi karo dhammaantood. Isku day mar labaad maalinta ku xigta iyo u dabaaldeg inaad ka fiicnaatay waqtigii shalay.

Kaararka xarfaha

5 daqiiqo

Rog-rog kaararka xarfaha ee fudud. Haddii uu ilmahaagu ku xayirmo, ku dhawaaq xarfaka, ka codso inuu ku celiyo, ka dibna dib ugu noqo kaarkaas ka hor inta aadan dhammayn.

Hel, magac u bixi

3 ilaa 4 daqiiqo

Magacow xaraf, ka dibna ka codso ilmahaaga inuu farta ku fiigo xarfakaas oo ku yaalla bog ama warqadaha lagu dhejiyo meelaha (poster); ka dibna isweydaarsada doorka si ay iyaguna u magacaabaan xarfaha oo aad adigu u raadiso.

Waxyaabaha la eegayo

- * Magacaabista xarfaha ayaa ka mid ah xirfadaha akhriska ee dhifka ah oo ay xal u tahay ku celcelin fudud oo joogto ah; wax yar oo la sameeyo ayaa marar badan natiijooyin cajiib ah keenta.
- * Waa wax iska caadi ah in xarfuhu marna la xusuusto marna ay xasuustooda kaa tagto marka koowaad. Joogteynta toddobaadyo badan ayaa ah waxa dhisa.
- * Haddii aad dareemeyso in magacaabista xarfuhu ay tahay mid aad u gaabineyso ama aan joogto ahayn marka la gaaro xiliga dambe ee fasalka Barbaarinta, waxaa habboon in arrintaas loo sheego macalinka.



Xusuusin gaar ah oo ku socota qoysaska:

- **Ku bilow xarfo macno leh.** Baar xarfaha ku jira magaca ilmahaaga, oo si wada-jir ah uga dhex raad-raaca buuggaagta, calaamadaha sida magaca shay (label), iyo calaamadaha sida kuwa jidadka.
- **In si sax ah wax loo sameeyo ayaa ka horeysa in si dhakhso ah loo sameeyo.** Ilmahaaga sii waqti uu ku magacaabo xaraf kasta. Haddii ay u baahdaan caawimaad, sheeg magaca oo ka codso inay ku celiyaan.
- **Tababar ku sameeya dhawr xaraf markiiba.** Ku dar xarfaha waaweyn iyo kuwa yaryar, dib u eeg kuwa hore loo yaqaanay, oo u dabaaldeg wax barashada cusub adigoo dareemin cadaadis ah inaad degdegto.
- **Ku Raaxayso Akhriska:** Wada akhriya iyo ku raaxeysta buuggaagta xarfaha, adigoo ilmahaaga ku dhiirigelinaya inay arkaan xarfaha ay yaqaaniin iyo ay ka hadlaan sawirada. La wadaag buuggaag isku xira barashada xarfaha ee fasalka iyo ku raaxaysiga akhriska.